



Orientation to Ontario

XUQUUQDA SHARCIGA AH IYO ADEEGYADA

XEERKA XUQUUQAHA IYO XORIYADHAHA EE CANADA

Xeerkaayaa ilaalinaaya xuquuqaha iyo xoriyadaha soo socda ee labadaba ragga iyo dumarkaba:

- Xoriyada muujinta mabaadii'daada.
- Xoriyada la socoshada qofka aad doonto.
- Xoriyada ku dhaqanka diintaada.
- Xaqa aad u leedahay inaad meeshaad doonto uga noolaato Canada.
- Xaq aad u leedahay in lagaa difaaco xiritaanka sharci darada ah, iyo xaqa aad u leedahay inaad cadaalad hesho.
- Xaqa aad u leedahay difaaca loo siman yahay iyo faa'iidada loo siman yahay ee sharciga adigga oo aan lagu takoorin sabab la xariirta isirkaaga, wadanka ama qoomiyada aad kasoo jeedo, midabkaaga, diintaada, jinsiga, da'da, ama naafada dhimirka ama jidhka.
- Xaqa aad u leedahay inaad adeegyo ka hesho dawlada federaalka ah kuwaasoo ku baxaaya midkood Ingiriis ama Faransiis.

Ka akhri Xeerka bogga Waaxda Cadaallada ee Federaalka: justice.gc.ca ama findlink.at/constiacts

XEERKA XUQUUQDA AADANAHA EE ONTARIO

Sida ku cad Xeerka, waa sharci daro in qof loo takooro ama lagu dhibaateeyo qof dhinacyada shaqada, guryaha iyo adeegyada ayadoo loo cuskanaayo da'da, jinsiga, qoomiyada, meesha uu kasoo jeedo, diinta,

naafada, xaalada guurka (ayna ku jiraan dadka isku jinsiga ah ee isqaba), aqoonsiga, diiwaanka danbiyada, aqoonsiga jinsiga ama dookha galmada.

Haddii aad aaminsan tahay in lagugu takooray sabab la xariirta sifooyinka sharcigu difaacaayo, waxaad codsan kartaa Dacwada Xuquuqda Aadanaha. Si aad u hesho caawimaad sharci oo aad ka helayso Xarunta Taageerada Xuquuqda Aadanaha ee Sharciga, booqo hrlsc.on.ca

Wax badan ka ogoow xuquuqaha Aadanaha ee ka jira Ontario adoo booqanaaya Guddiga Xuquuqda Aadanaha ee Ontario: ohrc.on.ca

XUQUUQAHA DHALINYARADA

Inkastoo qofka da'yarka ah loo arko qof qaangaar ah markuu gaaro 18 sano, waxaa jira sharciyo kale oo ku salaysan da'da. Gudaha Ontario, waa inaad gaartaa 19 sano jir si aad u cabto ama u iibsato maandooyinka tubaakada. Da'da oggolaanshaha galmada waa 16 sano, ayadoo ay jiraan shardi dhaafyada qaar.


Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan da'da oggolaanshaha justice.gc.ca ama findlink.at/ageconsent

ADEEGYADA SHARCIGA

Xog badan ka ogoow nidaamka sharciga ee Ontario iyo sida lagu helo adeegyada sharciga:

Si aad u hesho liiska qareennada iyo kaaliyaasha ku dhaqan Ontario, booqo bogga Ururka Sharciga ee Canadada Kore lsuc.on.ca ama findlink.at/tlsu

Funded by / Financé par :



- Legal Aid Ontario ayaa siisa adeegyada sharciga dadka danyarta ah. Wac 1-800-668-8258 ama booqo legalaid.on.ca
- Settlement.org waxaad ka helaysaa xog ku saabsan nidaamka cadaallada ee Canada iyo adeegyada sharciga: settlement.org ama findlink.at/Legal-Serv
- Haayada Barashada Sharciga ee Bulshada Ontario ayaa soo saarta waraaqaha xogta si looga caawiyo dadka inay fahlaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sharciga. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo cleo.on.ca
- Si aad u hesho xogta sharciga (oo lagu helo in ka badan 170 luuqadood), wac 1-866-252-0104 ama booqo Justice Ontario: attorneygeneral.jus.gov.on.ca ama findlink.at/on-justice

Haddii aad dareemayso inay si cadaalad daro ah kuula dhaqantay dawlada Ontario, waxaad dhacdada ku wargelin kartaa Qareenka Ontario: ombudsman.on.ca

OGEYSIIS MUHIIM AH

Gudaha Ontario, labo sharci oo muhiim ah ayaa difaacaaya xuquuqdaada iyo xoriyadahaaga sharciga ah:

- XEERKA XUQUUQAHA IYO XORIYADAHA EE CANADA.
- Xeerka Xuquuqaha Aadanaha ee Ontario

